

# FCA PPI DEADLINE 29 AUGUST 2019

**Wakhtigu wuu  
dhamaanayaa in la  
sameeyo cabashada PPI**

**Qaad tallaabo ka hor  
inta aanay goor dambe  
noqon.**

# Maxay tahay PPI?

PPI (Caymiska Ilaalinta Lacag bixinta) waxay ahayd xeerka lagu iibiyey alaabooyinka daynta sida amaahda, daynsiga guryaha, kaararka amaahda, kaararka dukaanka iyo amaahda liisaska.

PPI waxaa loo sameeyay inay daboosho dib u bixinta lacag aadan awoodin in aad bixiso. Tusaale ahaan haddii shaqada lagaa dhimay ama aadan shaqayn karin shil kugu dhacey awgeed xanuun ama naafanimo.

**Haddii aadan u caban adeeg bixiyahaaga ka hor 29 Ogosto 2019, awood uma yeelan doontid inaad lacag dib uga sheegato PPI – sida darteed waa inaad go'aankaaga gaartaa sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagalka ah.**

# Miyey PPI i khuseysaa aniga?

Xeerar gaaraya Malaayiin PPI ah ayaa lagu kala gatay UK badankood waxa la gadey inta u dhaxeysa sanadihii 1990 ilaa 2010. Haddii aad qaadatay alaabo deyn ah xiligaasi waxa laga yabaa in sidoo kale lagaa gadey PPI.

**FCA waxa ay leedahay diiwaan adeeg bixiyaal dhammaystiran oo PPI ah kuwaas oo laga yaabo in ay gadeen PPI. Raadi 'FCA PPI' ama wac 0800 101 88 00.**

# Sideen ku garanayaa haddii aan xaq u leeyahay in aan sameeyo cabasho ku saabsan PPI?

Waxaanu ogaanay in PPI inta badan si khaldan loo iibiyay.

Tusaalooyinka si xun u iibinta waxaa ka mid ah:

- PPI oo laguugu daro amaahdaada lacageed ama alaabta deynta aad ku qaadatay iyaddoon lagu sheegin.
- In laguugu cadaadiyo inaad qaadato PPI amao ku qasban tahay.
- In lagugula taliyay inaad iibsato PPI mar aad shaqo la'aan ahayd ama ku haysatay lahayd xaalad caafimaad oo hore u jirtay.

Waxaa dhici kara qaabab kale PPI ah oo si khaldan lagaaga iibiyey.

Sidoo kale waxa aad awoodaa inaad cabasho sameeyso haddii aad u malaynayso in bangigaaga ama adeeg bixiye kale in ay PPI - **dada ka sameeyen khidmad badan** oo aynana ku sheegin xilligii lagaa gadayay.

Malaayiin cabashooyin oo ku saabsan PPI ayaa hada la sameeyay in ka badan £34 bilyan ayaana dib loo sheegtay.

**Haddii aadan u caban adeeg bixiyahaaga ka hor 29 Ogosto 2019, awood uma yeelan doontid inaad lacag dib uga sheegato PPI – sida darteed waa inaad go'aankaaga gaartaa sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagalka ah.**

## Sideen ku hubiyaa haddii aan lahayn PPI?

Haddii aad qaadatay amaah ama alaab deyn ah laakiin aadan hubin in aad lahayd PPI, waa inaad ka hubisaa adeeg bixiyahaaga.

Adeeg bixiyaal badan hadda waxay sameyaan agab onlayn ah si ay kaaga caawiyaan inaad hubiso.

Waxaad ka heli kartaa liiska adeeg bixiyaasha PPI-da oo dhammaystiran iyo halka lagala xiriiro websaydka FCA. **Booqo [www.fca.org.uk/ppi](http://www.fca.org.uk/ppi) ama Isoo wac 0800 101 8800.**

**Hubinta haddii aad lahayd PPI waa mid fudud oo bilaash ah. Haka welwelin wax ku saabsan waraaqaha shaqada, waxa aad u baahan tahay magacaaga, taariikhda dhalashadaada iyo cinwaanadaadi hore (adares).**

## Sidee cabasho ugu sameeyaa PPI?

Haddii si khaldan lagaaga iibiyey PPI waxa xaq u yeelan kartaa inaad samayso cabashada iyo in mustaqbalkana dib u sheegato lacag.

Haddii aad go'aansatay inaad cabasho sameysid, tani waa bilaash oo waad samayn kartaa laftaadu. Waxaa haboon inaad toos uga cabatid adeeg bixiyahaga kaas oo kaa iibiyey PPI-da.

Shirkada cabashoyinka ayaa kula soo xidhiidhi kara iyagoo ku siinaya caawimo inaad samayso cabashadaada PPI. Haddii aad go'aantay in aad isticmaashid shirkadaha cabashada waxaa dhici karta in ay kugu soo dalacaan adeegooda.

**Adeeg bixiyayaasha waxaa lagu waajibiyay in cabasho ay ka sameeyaan PPI-da si fudud, waa ayna ku caawin doonaan inta ay socoto howsha (shaqada).**

Waxaa jira qaabab aad kula xiriirii karto adeeg

bixiyahaagabixiyahaaha si aad cabasho u soo gudbiso:

- **Onlaynka** – adeeg bixiyaal badan waxay leeyihiin agabyada cabashada onlaynka ah ee ku jira websaykooda
- **Telefoonka** – la soco laymanka telefoonadu waxa ay lahaan doonaan saacado xadidan oo ay shaqeeyaan
- **Boosta** – u oggolow wakhti ku filan cabashada si ay u gaarto adeeg bixiyahaaga ka hor 29 Ogosto muddada loo qabtay.
- **Gudaha faraca** – la soco wakhtiyada furitaanka iyo xiritaanka faracaaga maxaliga ah

Adeeg bixiyahaaga waxa uu eegi doonaa cabashadaada (waxay ku waydiin karaan macluumaad dheeri ah sidaa daraadeed hubso inaad siiso meel ay kaala soo xiriiraan.

Adeeg bixiyahaaga waa in uu kugu soo jawaabaa sideed todobaad gudahood haddii aad ku guuleysatay cabashadaada laguuna ogolyahay lacago aad ku leedahay iyaga iyo in ay u baahan yihiin waqti dheeraad ah si ay u eegaan cabashadaada.

**Waqtigu wuu cararayaa. Haddii aadan u gudbin cabashadaada adeeg bixiyahaaga ka hor 29 Ogosto 2019, awood uma yeelan doontid inaad lacag dib ugu sheegato PPI.**

# Sideen ku garanayaa haddii aan xaq u leeyahay inaan ka cowdo khidmada uu shaqaystay adeeg bixiyahu?

Bangiyada iyo adeeg bixiyayaasha kale waa inay hadda sidoo kale ay ka fekeraan cabashooyinka PPI-da ee ku saabsan khidmad ay ka shaqaysteen PPI.

Tani macnaheedu waxa weeye waxaad hadda awoodaa inaad cabasho sameyso haddii aad u malaynayso in bangigaaga ama adeeg bixiye kale uu shaqaystay khidmad aad u sareysa oo ka timid PPI-daada uusana ku sheegin.

Sidoo kale tani waxay ka dhigantaa inaad dib u heli karto cadad lacaeed xitaa haddii aan si qaldan lagaaga iibin PPI. Haddii aad hore u samaysay cabasho si qalad wax lagaaga iibiyey balse cabashadaada la soo diidey weli waxa aad awoodaa in aad sameyso cabasho cusub.

## Hore ma uga cabatay in si qaldan PPI lagaaga iibiyey?

### **“Maya”**

Waxaa haboon in aad ka fekerto haddii si qaldan lagaaga iibiyey PPI. Xitaa hadii aadan u sheegin adeeg bixiyahaagu waxa uu ka fekeri doonaa khidmadda ay shaqaysteen inay tahay mid laxiriita cabasho si qaldan wax loo iibiyay.

### **“Haa”**

- **Cabashadaada waa la diiday**

Waxaad awood u yeelan kartaa inaad samayso nooc cusub oo cabasho ah oo ku saabsan khidmadda uu shaqaystay bangiga ama adeeg bixiye kale taas oo la xiriira adeeg bixiyahaaga.

- **Cabashadaada waa lagu guuleystay oo waxaa lagu soo celiyey dhammaan lacagtaada ama qeyb ka mid ah lacagtaada**

Dib uma heli doontid lacag dheeri ah, haddii aad sameysay cabasho la xiriirta lacag dulsaar ah oo aad ka heshay hindise sharciyeedka PPI. Tani waxa ay sabab u tahay ma jirto khasaare hadhay oo aad u baahantahay inaad dib u sheegato.

- **Waxaad ka cabatay wax ku saabsan PPI laga bilaabo dabayaaqadii 2015.**

Adeeg bixiyahaaga waa in uu mar hore kugu sheegay qoraal ahaan inay ka fekereen khidmadda ay shaqaysteen in ay qayb ka tahay cabashadaada – hubi warqaddaha shaqo ee cabashadaada ama la xidhiidh adeeg bixiyahaaga haddii aanad hubin.

## **Maxaa dhacaya haddii aanan ku faraxsanayn natiijada cabashadayda?**

lhaddii aanad ku faraxsanayn jawaabta kama dambayska ee aad ka hesho adeeg bixiyahaagu (ama aanad ka helin wax jawaabo ah sided todobaad gudahood) waxaad u caban kartaa Qeybta Cabashada ee Dhaqaalaaha **0800 023 4567**.

**Waxaa nahay Masuuliyiinta Dhaqanka  
Maaliyadeed (FCA).  
Waxaan maamulnaa qaybta adeegyada  
maaliyadda oo halkan waxaan u joognaa si  
aanu kuu ilaalino.**

Warqadan yar waxay ku siinaysaa macluumaad si ay kaaga caawiso inaad go'aan ka gaarto haddii aad samayn lahayd cabashada PPI.

Haddii aadan u caban adeeg bixiyahaaga ka hor 29 Ogosto 2019, awood uma yeelan doontid inaad lacag dib ugu sheegato PPI.

**Booqo websaydkayaga:  
[www.fca.org.uk/ppi](http://www.fca.org.uk/ppi)**

**Wac laynkayaga caawinta:  
0800 101 8800**

(Fadlan waydii haddii aad u baahan tahay macluumaad ku qoran luuqad kale ama qaab kale)

**Ama fariinta telefoonka:  
18001 01434 372 580**